




Howlaha Magaalada ee Diyaarka u ah Dadweynaha Degan



Howlaha Magaalada ee Diyaarka u ah
Dadweynaha Degan

MAGAALADA BEAVERTON

Tusmo

Maktabada Magaalada Beaverton	3
Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Magaalada	3
Qeybta Horumarinta Bulshada	3
Qeybta Dhismayaasha Qeybaha	3
Howlaha Guryaha iyo Bulshada.....	4
Qeybta Qorsheynta	4
Qeybta Horumarinta Dhaqaalaha iyo Maaliyada	4
Horumarinta Maaliyada.....	4
Horumarinta Dhaqaalaha	5
Howlaha Teknikada	5
Gaadiidka	5
Korontada, Biyaha, iwm	6
Qeybta Maamulka Howlaha Degdegta	6
Qeybta Miisaaniyada	7
Qeybta Shaqaalaha	7
Xafiiska Duqa Magaalada	7
Gudiga Farshaxanka ee Beaverton (Arts Commission)	7
Xafladaha Bulshada	8
Barnaamijka Derisyada	8
Maamulka Rekoorka iyo Rekoorada Magaalada	10
Barnaamijka Dhaqangelinta Sharciyada Dhismayaasha (Code Compliance Program)	101
Xarunta Xalinta Qalalaasaha	11
Dib u abuurida Beaverton	12
Barnaamijka Dib u isticmaalka qashinka (Recycling)	12
Beeraha Bulshada	12
Maxkamada Magaalada	12
Qeybta Booliiska	13
Qeybta Shaqaalaha Bulshada	13
Qeybta Howlaha Dayactirka.	14
Horumarinta Goobaha Dhismayaasha	14
Howlaha Web-sayd-ka	15

Inta badan xafiisyada magaaladu waxay furan yihiin inta u dhaxaysa saacadaha 8:00 am iyo 5:00 pm, Isniinta ilaa Jimcaha, haddii aanay si kale ku qornayn. Fadlan ka fiiri boga webside-ka Qeybta aad doonayso saacadaha ay shaqeeyaan si aad u habsato inaad haysato warbixinta saxda ah.

Maktabada Magaalada Beaverton waxay hayaan qoraalo fara badan oo ay ku jiraan buugaagta ugu sareeya iyo CD-yo, kuwo musik ah, kuwo isku jir DVD-yo ah, qalab luqadaha ajnabiga ku qoran, iyo waxyaabo intaas dheerba. Maktabadu waxay ku taalaa labo meelood oo kala ah, 12375 SW 5th Street, Beaverton, OR 97005 iyo 11200 SW Murray Scholls Place, Suite 102, Beaverton, OR 97007-9702. Ka soo wac (503) 644-2197 wixii warbixin dheeraad ah ama soo booqo boga <http://beavertonlibrary.org/>.

Howlaha Maktabadu qabato

- Deyminta Buugaagta, CD-yada, DVD-ga, Blu-Ray, kombuter games iyo waxyaabo dheeraad ah.
- Howlaha kale:
 - Illaha Warbixinada Qaaska ah ee Macaamiisha
 - Qalabka Ganacsatada Cusub
 - Illaha iyo Barnaamijyada Codsiyada iyo Shaqo raadinta
- Kombuter bilaash ah, lehna Internet, word processin iyo waxyaabo dheerada.
- Wireless bilaash ah oo ay ku xiran karaan macaamiisha isticmaalaya laptopka iyo Netbook-yadooda
- Macaamiishu waxay ku soo dhawaan lood gareeysan garaan buugaag iyagoo isticmaalaya habka "Library2 Go" kuna aqrisnaya kombuterka gurigooda.
- Barnaamijyo waxbarasho iyo dhaqan oo lacag la'aan ah.

Xafiiska Qareenka Magaaladu waxa uu siiyaa talo sharci ah iyo matalaadba Magaalada Wakiilada Magaalada iyo Maamulka Magaalada. Xafiisku ma siiyo talo sharci ah oo toos ah dadweynaha.

Si aad wax badan uga ogaato soo booqo <http://www.beavertonoregon.gov/departments/attorney> ama soo wac (503) 526-2215.

Howlaha

- Caawinaada Dhibanayaasha

Qeybta Horumarinta Bulshada waxay maamulaan iyo qorsheeyaan sharuucda dhismaha Magaalada. Shaqaalaaheeduna waxay eegaan mashaariicda dhismayasha si ay u hubiyaan in la raaco dhamaanba sharuucda dhismaha, iyo maamulaan bixinta ogolaanshada dhismayaasha.

Si aad wax badan uga ogaato soo booqo <http://www.beavertonoregon.gov/departments/cdd/> ama soo wac (503) 526-2493.

Qeybta Dhismaha

Qeybta Dhismaha Magaaladu waxay bixiyaan howlo kala duwan oo la xariira dib u eegida iyo soo baaritaanka dhismayaasha ka dib markii la siiyo ogolaansho. Waxay furan yihiin Isniinta ilaa Jimcaha inta u dhaxaysa 7:30am-12:00pm; 1:00pm-4:00pm

Howlaha la xariira Web side-ka waxaad ka heli kartaa:
<http://www.beavertonoregon.gov/departments/CDD/Building/>

Howlaha

- Bixinta lacagta dhismaha/ogolaanshada. Lacagta waxaa lagu bixin karaa hab kasta oo ay ku jiraan ku bixinta kredit kaarka (oo xadka kredit kaarku yahay \$1,000)
- Bixinta Shahaadada Degenaanshada (Certificate of Occupancies)
- Bixinta Ogolaanshada dhismaha
www.beavertonoregon.gov/departments/CDD/Permits
- Dib u eegida qorshaha dhismaha
- Soo booqashada (ogolaanshada furan)

Howlaha Guryaha iyo Bulshada

Waaxda Howlaha Guryaha iyo Bulshadu waxay qeyb ka yihiin qeybta qorshaynta oo waxay hada maamulaan miisaaniyada guryaha Magaalada ee ay bixiso Hayada Horumarinta Guryaha iyo Magaalooyinka ee US. Haddii aan si kale lagu sheegin, barnaamijka guryahu waxa uu ku saleysan yahay xadka daqliga ku soo gala.

Si aad wax badan uga ogaato, fadlan naga soo wac (503) 526-2533.

Howlaha

- Hope-4-Homes: Barnaamijka deynta dayactirka guryaha ee aan dulsaarka lahayn ama uu yar yahay dulsaarkeedu
- Adapt-A-Home: Deeq yar oo lagu caawinayo wax ka badalka guriga si looga dhigo mid si sahlan loo isticmaali karo (jaranjarada, biraha la qabsado, iwm)
- Mend-A-Home: Deeq yar oo ah dayactirka guryaha lagu guuri karo (mobile)
- Energy Efficiency Loan Program: Deynta Dhaqaaleynta Isticmaalka Tamarta Guriga (barnaamijkaani kuma saleysan xadka daqligaada).

Qeybta Qorsheeynta

Qeybta qorsheeyntu waxay qorshe u dajisaa koritaanka iyo hormarinta Magaalada. Qeybtu waxay sidoo kale hubiyaan in mashruucyada cusubi ay fuliyaan sharuucda dhismaha iyo waxyaabaha looga baahan yahay isticmaalka dhulka, Waxay furan yihiin Isniinta ilaa Jimcaha inta u dhaxaysa saacadaha 7:30am-5:00pm.

Howlaha ay qabtaan ee aad ka heli karto intenetka ka fiiri:

www.beavertonoregon.gov/departments/CDD/Planning

Howlaha

- Bixinta qarashka codsiga/ogolaanshada: Lacagta waxaa lagu bixin karaa hab kasta oo ay ku jiraan ku bixinta kredit kaarka (oo xadka kredit kaarku yahay \$1,000)
- Dib u eegida qorshaha iyo dhagaysiga fikradaha dadweynaha
- Howlaha qorsheynta codsiga ka hor ah
- Qariiradaha
- Qorshaha Bulshada www.beavertoncivicplan.com
- Dib u cusboonaysiinta Magaalada
www.beavertonoregon.gov/departments/CDD/planning/BURA

Qeybta Horumarinta Dhaqaalaha iyo Maaliyada waxay bixisaa barnaamijyo kala duwan oo loogu talo galay inay u soo jiidaan fursado ganacsi iyo shaqooyin cusub degaanka, siiyaana caawinaad gacasadadii horay u jiray ee doonaya inay sii balaariyaan fursadahooda ganacsi, iyo sidoo kale siiyaan illaha ay u baahan yihiin ganacsatada biloowga ah ee doonaya inay shaqo bilaabaan, iyo dhiiri geliyaan dib u habeeynta magaalo qiimo leh.

Horumarinta Maaliyada

Qeybta Horumarinta Maaliyadu waxay maamushaa sameeynta Qorshaha Hagaajinta Maaliyada (Capital Improvement Plan (CIP), kaasoo hubiya in habka qaabka dhismaha Magaaladu leeyahay awood uu wax uga qabto baahida mashaariicda cusub ee koritaanka Magaalada.

Si aad u aragto CIP iyo mashaariicdooda soo booqo:

http://www.beavertonoregon.gov/departments/ecd/CapitalProjects/capital_map.aspx

Horumarinta Dhaqaalaha

Si aad wax badan uga ogaato sida ay Magaaladu kaaga caawin karto inaad kor u sii kacdo, soo degto, xaga dhaqaalaha, ama aad ganacsigaada uga biloowdo Beaverton, naga soo wac 503-526-2344 ama soo booqo www.businessbeaverton.com.

Howalaha

- Dib u dejinta Ganacsiga & Sii balaarinta
- Kobcinta Dhaqaalaha Degaanka (Economic Gardening)
- Bilaabida Ganacsiga Cusub
- Caawinaada Ganacsiga ka shaqeeya Taknoolajiga (bilaabida iyo balaarinta)
- Caawinaada Horumarinta (howsha magaalada)
- Barnaamijka Deynta Ganacsiga soo koraaya
- Barnaamijka Hagaajinta Dukaanada Faras magaalaha
- Barnaamijka Deynta Balaarinta Ganacsiga
- Kobcinta Ganacsiga (xarunta horumarinta ganacsiga)

Howlaha Teknikada ah

Qeybta Howlaha Teknikadu waxay siisaa dadweynaha warbixinada la xariira dhismayaasha Magaalada. Hoosna waxaa ku qoran howlaha qaaska ah ee loo qabto dadweynaha. Wixii warbixin dheerada ah waxaad ka soo booqataa

www.beavertonoregon.gov/departments/ecd/techservices.

Howlaha:

- Waxay bixiyaan caawinaada teknikada, Tallo siinta, iyo howlaha falanqeynta ee la xariira qeybta injiyeeriyada iyo qaabka qaaska ah ee goobta la dhisayo ee magaalada.
- Waxay kaloo bixiyaan tafaasiisha macluumaadka, ee warbixinta dhismayaasha iyo buuga Habka Injineeriyada Magaalada iyo shaxo caadi ah.
- Waxay hayaan macluumaadka la xariira habka dhismaha magaalada; bixiyaan iyo macneeyaan daraasadaha warbixinta guryaha magaalada ku yaal.
- Waxay ilaaliyaan iyo bixiyaan macluumaadka joqoraafiga ee vertical iyo horizontal ee saldhiga magaalada ee GPS-ku isticmaalo.

Gaadiidka

Qeybta Gaadiidku waxay bixisaa howlaha qorsheeynta gaadiidka iyo injineerada. Qeybtu waxay masuul ka tahay qorsheeynta iyo sameeynta wadooyinka Magaalada, nalalka signalka baabuurta, meelaha dadku ka maraan wadada, iyo sidoo kale Qorsheeynta Gaadiidka iyo la shaqeeynta mashaariicda cusub si loo aqoonsado raadka gaadiidka. Wixii warbixin dheeraad ah ka soo booqo: www.beavertonoregon.gov/departments/ecd/transportation.

Howlaha:

- La socoshada gaadiidka iyo dayactirka qalabka signalada gaadiidka iyo habayntooda.
- Qorsheeynta iyo maamulida Barnaamijka yareeynta Socodka Gaadiidka Magaalada.
- Dib u eegida dhamaanba dhismayaasha cusub si loo hubiyo in jidadka gaadiidku maraan aanay wax raad xun ah ku keenin iyo inay sameeyaan meelo haboon oo uu dadku maro.

Korontada, Biyaha, Qashinka, iwm (Utilities)

Qeybta Korontada, Biyaha, Qashinka, iwm ee Magaalada Beaverton waxay bixiyaan injineerada, maamulka, sharuucda, iyo qibrada teknikada oo ay u qabtaan biyaha Magaalada, meelaha biyaha qashinka iyo qalabka biyaha daadku maro. Howlaha ay hayadahaasi shaqsi ahaan magaalada u qabo waxay ku qoran tahay hoos.

Si aad wax badan uga ogaato soo boqo

<http://www.beavertonoregon.gov/departments/ecd/utilities/>.

Howlaha Biyaha:

- Helitaanka Qalabka Biyaha
- Baaritaanka Isku xirka meelaha ay biyuhu iskugu yimaadaan:
 - Baaritaanka shaqada
 - Baaritanka Sanadlaha ee Qalabka ka hirtaga biyaha wasaqda (Backflow)
- Saldhiga macluumaadka iyo Qriirada Dayactirka Habka Biyaha
- Biyo dhaqaalaynta iyo dib u nadiifinta biyaha (Water Conservation)
- Dib u eegida Qorshaha
- Siinta caawinaada teknikada iyo ka jawaabida su'aalaha macaamiisha iyo talooyinkooda la xariira qalabka ka hortaga biyaha wasaqda iyo tayada nadaafada biyaha ee meelaha ay biyuhu iskugu yimadaan.

Howlaha Qashinka biyaha wasqda

- Sameeynta habka cusub ee biyaha musqulaha
- Badalaada qalabka duqoobay
- Helitaanka goobaha biyaha wasaqdaa (Sewer)

Howlaha Biyo Mareenada

- Helitaanka goobaha ay maraan qalabka biyaha qaada

Waaxda Maamulka Howlaha Degdegta ah Waaxdaani waxay raadisaa horumarinta iyo sameeynta awooda Magaalada ee u diyaar garoowga, ka jawaabida, iyo yareeynta dhibatooyinka ay keenaan dhacdooyinka dabiiciga ah; si loo yareeyo dhimashada iyo dhaawac ku yimaada dadka iyo hantida, hubiyaana in a dowladu howshaas qabato iyo caawinaada dib u soo gurashada lagu sameyo markii ay dhibaato dhacdo.

Si aad wax badan uga ogaato soo booqo www.beavertonoregon.gov/emergency.

Howlaha

- Kooxda Jawaabta Degdegta ee Bulshada (CERT)
- Wacyi gelinta U Diyaar garoowga Bulshada/La xariirida
- Diyaarinta warbixinta internetka ee u diyaar garoowga xaaladaha degdegta

Qeybta Miisaaniyada waxay maamushaa miisaaniyada, xisaabaha, soo iibsashada, iyo habka shaqaaleynta. Wixii warbixin dheeraad ah ka soo booqo www.beavertonoregon.gov/departments/finance.

Howlaha:

- Bixinta Lisenada Ganacsiga
- Codsiyada Basaboor-ka, saacadaha xafiiska: Talaado – Jimcaha 12 PM – 4:45 PM (*Ma laha howlaha Masawirada*)
- Bixinta Biilka (biyaha, qashinka, iyo biyaha daadka)
- Fasaxa Barkin-ka
- Bixinta Lisenada guryaha dadka waayeelka
- Gelinta fursadaha tartanka qandaraasyada Internetka
<http://www.beavertonoregon.gov/departments/finance/purchasing/bids.aspx>

Qeybta Shaqaalaha waxay maamulaan shaqaalaha Magaalada iyo fursadaha shaqada

Wixii warbixin dheeraad ah ka soo booqo www.beavertonoregon.gov/departments/hr ama wac (503) 526-2200.

Howlaha:

- Inay soo bandhigaan boosaska shaqooyinka cusub ee Magaalada

Xafiiska Duqa Magaalada waxa uu bixiyaa howlo fara badan oo uu ku qabto dhowr barnaamij oo kala duwan.

Guddiga Farshaxanka Beaverton

Guddiga Farshaxanka ee Beaverton waxay iskugu keenaan bulshada iyagoo soo bandhiga hormariyana farshaxanka. Farshaxanku waxa uu iskugu keena bulshada hal meel iyagoo u dabaaldegaya dhaqanadooda kala duwan iyo kuwada farxida doonitaankooda. Wixii warbixin dheeraad ah waxaad ka soo booqataa www.beavertonarts.org.

Howlaha

- Farshaxano maqal iyo muuqaalba leh oo ay u qabtaan sanadka oo dhan caruurta, dadka qaan garaka ah iyo qoysaska degaanka Beaverton (qiyaastii hal mar bishiiba).
- Yihiin illaha iyo hayada ay kala soo xariiraan dadka degan Beaverton wixii la xariira warbixinta iyo fursadaha farshaxanka (tusaale ahaan: gadida iyo qiimeeynta farshaxanka).
- Waxaay sahalnaa wada shaqeynta ka dhaxaysa farshan yaqaanka iyo hayadaha bulshada, ururada waxbarashada iyo ganacsatada si anu uga caawino xalinta dhibaatooyinka farshaxanka ee la soo gudboonaada bulshada.
- Waxaanu qiimeeynaa hurimarka farshaxan yaqaanka degaanka inagoo u qabana saminaaro iyo wada shaqeynba.

Xafladaha Bulshada

Barnaamijka Xafladaha Bulshadu waxa ay qabtaan dhowr xafladood oo magaalada oo dhan ah sanad walba oo ay ku hormarinayaan iyo ku adkeeynayaan macnaha ahaanshada bulshada Beaverton.

Wixii warbixina ee la xariira xaflada soo socota ee magaalada soo www.beavertonoregon.gov/events ama ka soo wac (503) 526-2559.

Barnaamijka Derisyada

Barnaamijka Derisyadu waxa uu maamulaa Guddiyada Ururka Derisyada Magaalada (NACS), waxana uu caawiyaa Wakiilada iyo Guddiga Magaalada iyo sidoo kale iskuduwaa barnaamijka Beaverton Cares initiative.

Si aad wax badan uga ogaato soo booqo www.beavertonoregon.gov/departments/neighborhoods ama soo wac (503) 526-3706.

Beaverton Cares

Barnaamijka Beaverton Cares waxa uu hoy u yahay halka laga helo warbixinada ku saabsan caawinaadaha cuntada (*food stamps*), guryaha, caawinaada cimilada iyo deeqaha www.beavertonoregon.gov/departments/neighborhoods/resources

Wakiilada iyo Guddiga

Bogaga webside-ka Wakiilada iyo Guddiga iyo wixii warbixin dheeraad ah ka soo booqo www.beavertonoregon.gov/mayor/boards.

- **Beaverton Arts Commission Board:** Waxay bixiyaan helitaanka farshaxanka magaalada oo dhan oo ay ku jiraan gaarsiinta iskuulada, wax u qabadka farshaxanyaaqaanka degaanka, iyo barnaamijyada farshaxanka dadweynaha Magaalada.
- **Beaverton Committee for Citizen Involvement:** Guddigaan howlahiisa waxaa ka mid ah inuu u soo jeediyo barnaamij lagu dhiiri gelinayo ka soo qeybgalka dadweynaha maamulka Magaalada; la socoshada iyo qiimeeynta barnaamijyada ka soo qeybgalka dadweynaha ee ay tahay inay Guddiga Magaaladu ay qabtaan iyo soo bandhigaan; iyo inay warbixin u siiyaan si joogto ah Wakiilada Magaalada iyadoo ah warbixin qoraal ah iyo shirarka ama inaashada shirarka ee Wakiilada Magaalada.
- **Bicycle Advisory Committee:** Guddigaan la talintu waxay dhiirigeliyaan isitcmaalka bushkuleetuga ee Magaalada Beaverton; siiyaana shaqaalaha magaalada si ay dib u eegid ugu sameeyaan barnaamijyada ay dadweynuhu doonayaan ee ku lugta leh isticmaalka bushkuleetiga, helitaankiisa, iyo isticmaalkiisa guud; qiimeeyaana hababka jira ee wadooyinka bushkuleetiga iyo ku taliyaan sameeynta tixgelinta fursadaha lagu hagaajinayo Barnaamijka Wadada Bushkuleetiga.

- **Board of Construction Appeals:** Waxay dhagaystaan iyo go'aan ka gaaraan dacwadaha raxfaanka ee ay dadweynuhu uga dacwoonayaan diiditaanka magaalada, xayiraada, ama ka qaadida ogolaanshada dhismaha iyagoo ku saleeynaya macneeynta Magaalada ama codsiga sharciga taknikaalka.
- **Budget Committee:** Waxay dib u eegid ku sameeyaan miisaaniyada ay doonayso Magaaladu inay isticmaasho ka hor inta aan la horgayn Wakiilada Magalada si ay u eegaan oo go'aan kama danbeys ah uga gaaraan.
- **Citizens with Disabilities Advisory Committee :** Waxay matalaan dadweynaha Beaverton iyagoo u dooda shaqsiyaadka curyaanka ah.
- **Human Rights Advisory Commission:** Waxay caawiyaan xaquuqda bini aadanimada ee dadka degan Beaverton iyo waxay kor u qaadaan ogaanshada dadweynaha ee arimaha la xariira xaquuqda bini aadanka.
- **Library Advisory Board:** Waxay la taliyayaal u yihiin Maamulka Maktabada, Duqa Magaalada, iyo Wakiilada Magaalada kalana taliyaan arimaha la xariira Maktabada Magaalada. Guddiguna waxa ay ansaxiyaan iyo maamulaan Miisaaniyada ay ku shaqeeyaan Maktabadaha (Library Trust fund).
- **Mayor's Youth Advisory Board:** Waxay matalaan fikrada dhalinyarada bulshaweynta, waxay siiyaan fikradda iyo talo biixntooda saraakiisha la doortay iyo go'aan gaarayaasha kalana taliyaan arimaha bulshada, mashaariicda iyo waxyaabaha la soo jeediyay ee raadka balaaran ku yeelan kara dhalinyarada; gaarsiiyaan bulshaweynta arimaha quseeynaya ee la xariira dhalinyarada iyagoo isticmaalaaya daabicida warbixinta iyo fooman qoraalka oo arimahaas ka hadlaaya; qabtaana howlo dhexdhexaadina oo aan ka hor imanayn shaqooyinka hayadaha kale ee dowlada ama qeybaha Magaalada; iyo waxay talo bixin ka dhibtaan xalinta dhibaatooyinka qaaska ah ee hortaagan dhalinyarada Magaalada.
- **Planning Commission:** Guddigaani waa maamulayaasha go'aanka ka gaara codsiyada la xariira isticmaalka dhulka. Guddigaani waxay sidoo kale talo ka siiyaan Wakiilada Magaalada Wax kabadalida Sharuucda Hormarinta Dhulka, Isbedelada Soonanka, iyo codsiyada Wax kabadalida Qorshaha Guud.
- **Senior Citizens Advisory Committee:** Waxay bixiyaan hab ka dhex jira dowlada Magaalada oo ay dadka waayeelka ahi kula xariiraan dadweynaha guud ee magaalada iyo madaxda Magaalada. Midaas waxaa lagu gaara iyadoo siminaaro loo qabto madaxda magaalada oo ay ka soo qeybgalaan dadka waayeelka ah.
- **Sister Cities Advisory Board:** Waxay sameeyaan Barnaamij la iskugu xirayo wada xariirka magaalooyinka kale. Barnaamijku waxa uu ka shaqeeyaa sidi uu u dhiirigelin lahaa isweydaarsiga dhaqanada kala duwan iyo isfahanka iyo sameeyaa waxbarasho iyo isweydaarsi ganacsi oo ka dhaxeeya magaalooyinka aanu wada xariirno ee aduun weynaha.

- **Traffic Commission:** Guddigaan howlihiisa waxaa ka mid ah dib u eegida isbedelada waaweyn ee gaadiidka magaalada ee la soo jeediyay, kala talinta Wakiilada Magaalada arimaha quseeya nabadgelyada gaadiidka, iyo caawinaada sameynta habka iyo sharuucda la xariirta maamulitaanka gaadiidka maraya halka uu dadku degan yahay.
- **Visioning Advisory Committee:** Guddiga Tallo bixinta Aragtida Magaalada Beaverton waxa uu ka shaqeeya sidii uu kor ugu qaadi lahaa howsha aragtida Dadweynaha, ku dhiiri geliyo ka soo qeybgalka dadweynaha ee dhiibashada aragtidooda, sameeyaan iyo habeeyaan qorshaha ficilka aragtida Magaalada, iyo inay siiyaan warbixin joogto ah Wakiilada Magaalada iyo daweynahaba ku saabsan sida ay u socoto howsha aragtida.

Howlaha Guddiga Ururada Derisyada (NAC)

- Inay bixiyaan deeqda lagu qurxinayo derisyada (ka codso NAC)
- Inay bishiiba mar u qabtaan shir NAC oo ku saabsan xaaladaha debka, booliiska iyo dhibaatooyinka Magaalada:
www.beavertonoregon.gov/departments/gis/GISApps/BSEARCH_NAC/BSearch.cfm
- Iskuduwaan dhacdooyinka NAC

Rekoorka Magaalada iyo Maamulida Rekoorka

Barnaamijka Rekoorka Magaalada iyo Maamulida Magaaladu waxa uu ku yaala Xafiiska Duqa Magaalada.

Si aad wax badan uga ogaato, fadlan soo booqo

<http://www.beavertonoregon.gov/departments/records/> ama soo wac 503-526-2497.

Howlaha

- Shirarka Wakiilada magaalada (jadwalka, dokumeentiga, qorida)
- Codsiga Rekoorka Dadweynaha (foomka iyo online-ka)
- Howlaha Nootaayaha
- Howlaha Doorashooyinka
- Qabashada Qolalka (Hoolka Magaalada/Makatabadaha)

Barnaamijka Dhaqangelinta Sharciga Dhismaha Magaalada

Barnaamijka dhaqangelinta Sharcigu waxa uu kala shaqeeya dadka ku nool Beaverton sidii loo ogaysiin lahaa iyo u raaci lahayeen sharciyada magaalada.

Si aad wax badan uga ogaato, fadlan soo booqo
www.beavertonoregon.gov/departments/codecompliance ama soo wac (503) 526-2270.

Si aad u soo sheegto dhibaato, fadlan soo booqo
www.beavertonoregon.gov/secure/reportproblem.

Howlaha:

- Inay soo baaraan raacitaanka sharciga magaalada oo ay ku jiraan:
 - Dhismayaasha banaan ee laga yaabo inay isticmaalaan guri laawayaasha
 - Baabuurta la dayacay
 - Jarida geedaha wadooyinka
 - Dhibaatooyinka dayactirka guryaha
 - Ka nadiifinta masawrida derbiyada
 - Bixiyaan fasaxyada ogolaanshada
 - Fasaxa Shimbiraha
 - Fasaxa masawririda xayawaanka

Xarunta Xalinta Qalalaashaha

Xarunta Xalinta Qalalaashaha waxay bixiyaan howlaha dhexdhexaadinta iska horimaadka, howlaha helitaanka goobaha shirka iyo baritaanka bulshada sida loo xaliyo dhibaatooyinka.

Si aad wax badan uga ogaato, fadlan soo booqo
<http://www.beavertonoregon.gov/departments/disputeresolution/> ama soo wac 503-526-2523.

Howlaha Dhexdhexaadinta

- Dhexdhexaadinta Derisyada
- Dhexdhexaadinta qofka guriga leh iy qofka ka ijaartay
- Dhexdhexaadinta dadka guryaha leh
- Sameeyaanta Hab loo xaliyo qalalaasaha
- Xalinta doodaha ganasiga iyo macaamiisha
- Xalinta doodaha dadka waayeelka

Howlaha Helitaanka

- Shir u qabashada kooxo yar ama kooxo waaweyn
- Shirarka Wada hadalka Bulshada
- Qorsheeynta kooxaha iyo xalinta dhibaatooyinka

Howlaha Wax barida Bulshada

- Tababarka Caadiga ah ee Xalinta Dhibaatooyinka
- Tababarida Dadweynaha: ee xirfadaha xalinta qalalaasaha
- Tababaro u gooni ah koox ama urur qaas ah

Dib u abuurida Degaanka Beaverton

Barnaamijka Dib u abuurida Degaanka Beaverton waxa uu ka shaqeeya hagaajinta badbaadinta degaanka Beaverton. Howlahooda waxaa ka mid ah wacyi gelinta dadweynaha iyo xafladaha iyo sidoo kale maamulida barnaamijyada lagu yareeynayo isticmaalka Karboonka.

Si aad wax badan uga ogaato, soo booqo <http://www.beavertonoregon.gov/departments/green/> ama soo wac 503-526-2545.

Howlaha

- Bloga Badbaadinta degaanka
- Xaflado dadweynuhu ka soo qeyb galo

Barnaamijka Dib u isticmaalida [Recycling]

Barnaamijka dib u isticmaalidu waxa uu bixiyaa howlaha wacyi gelinta dadweynaha degaanka, ganacsatada iyo ardayda ee quseeya daadinta qashinka, dib u isitcmaalidiisa iyo ka hortaga qashinka.

Si aad wax badan uga ogaato, soo booqo www.beavertonoregon.gov/departments/recycling ama soo wac 503-526-2665.

Howlaha:

- Barida dadka degaanka iyo ganacsatada waxyaabaha quseeya dib u isticmaalka qashinka
- Helitaanka qashin qaadida ee internetka
- Warbixinta qarashka howlaha qashin qaadida

Beeraha Bulshada

Barnaamijka Beeraha Bulshadu waxa uu kor u qaada iyo bixiyaa fursadaha beeraha oo ay dadka iyo dersiyada magaalada Beaverton bulsho ahaan iyo shaqsi ahaanba ka faa'iideysan karaan. Dadka ka soo qeybgala Beeraha Bulshadu waxay abuurtaan qudaar, ubax, iyo dhir qudaar macmanaac ah lehba. Magaaladu waxay hada leedahay labo meeloo oo beero joogto ah iyo hal meel oo beer ku meel gaar ah.

Si aad wax badan uga ogaato, soo booqo <http://www.beavertonoregon.gov/departments/gardens/> ama soo wac (503) 526-2665.

Howlaha:

- Inay ku diiwaangeliyaan goobaha beeraha internetka
- Diiwaangelinta beeraha waxaa ku jira dhulka, biyaha iyo helitaanka meel qashinka beerta lagu rido

Maxkamada Magaalada waxa ay ku taala Xarunta Xafiiska Magaalada Beaverton dabaqa 1^{-aad}. Saacadaha maxkamaduhu wey kala duwan yihiin, fadlan la xariir maxkamada aad doonayso si aad u ogaato saacadaha ay shaqeeyso. Ganaaxa waad ku bixin kartaa shaqsi ahaan, internetka, telefoonka, ama qorshaha lacag bixinta, wac (503) 526-2290 ama soo booqo www.beavertonoregon.gov/departments/court.

Howlaha

- Maxkada Gaadiidka (waxay furan tahay saacado dheeraad ah 3 habeen sitimaankii)
- Barnaamijka ka cafinta kursiga baabuurka danbiilayaasha marka koowaad.
- Howlaha dhagaystayaasha maxkamada (Jury Duty)
- Ganaaxa tikidhada masawirka Radar-ka
- Ganaaxa baabuurta
- Jabinta Denbiyda

Qeybta Booliiska Beaverton waxay u qabataa howlaha nabadgelyada bulshada dadweynaha ku dhaqan degaanka iyo waxay bixiyaan howlahaan bulshada ee hoos ku qoran, wixii shaqooyin dheeraad ah ama haddii aad doonayso warbixin dheeraad ah waxaad ka soo booqataa www.beavertonpolice.org.

Howlaha:

- La xariirida Xilliyada Danbe
- Diiwaangelinta Milkiilayaasha Ganacsiga
- Barnaamijka Alarm-ka
- Wicitaanka Howlaha Apartment
- Kaarka Shilka Apartment-ga
- Beaverton SAFE
- Barnaamijka Buddy Bear
- Klinigyada Kursiga Baabuurka
- Kuliyaada Sitizen-ka
- Hortaga Denbiyada ee Habka Degaanka
- Tirada Denbiyada Dhacay oo lagu qoro Internetka
- Xafladaha Jeexjeexida Sirta
- Heshiisyada Ka joojinta Maritaanka (Trespass)
- Howlaha Baaritaanka Faraha
- Tiririda Masawirada xun
- Barnaamijka Ka badbaadinta Xaditaanka Aqoonsiga & Qiyaamada
- Barnaamijka Badbaadada Guriga
- Barnaamijka Nadabgelyada Hoyga
- Habeenka Banaan u soo Bixida
- Xarumaha Illaha Derisyada (NRC)
- Ilaalinta Deriska
- Shiraka Milkiilayasha/Ijaartayaasha
- Kooxda Howlaha Booliiska
- Maxkamada Caruurta (Peer Court)
- Baabuurka Phantom
- Ururka Cayaaraha Booliiska
- SMART (Speed Monitoring Awareness Radar Trailer)
- Diiwaangelinta Denbiilaha Galmada
- Barnaamijka Speed Mitigation
- Kuliyaada Ardayda
- Barnaamijka Gaadiidka
- Barnaamijka Utility Watch Program
- Barnaamijka Foluntiyeeerka
- Maxkamada Dhalinyarada

Qeybta Howlaha Bulshada Waxay masuul ka yihiin maamulida, sameeynta iyo dayactirka wadooyinka magaalada. Qeybta waxaa ka mid ah howlaheeda sameeynta wadooyinka iyo dayactirkoodaba.

Si aad wax badan uga ogaato, soo booqo

<http://www.beavertonoregon.gov/departments/publicworks/> ama soo wac 503-526-2493

Dhistaanka goobaha ama 503-526-2220 shaqooyinka socda. Haddii ay kugu dhacaan xaalado degdeg ah xilliyada saacadaha shaqada ka dib ah, fadlan soo wac 503-526-2260.

Qeybta Howlaha iyo Dayactirka

Qeybta Howlaha iyo Dayactirka Magaaladu waxay qabataa dhowr howlood oo kala duwan oo la xariira dayactirka hantida dadweynaha Magaalada iyo wadooyinkeeda. Meelaha ay sida qaaska ah wax uga qabtaan waxaa ka mid ah dayactirida wadooyinka, nalalka wadooyinka, signalada wadooyinka, gaadiidka ay magaaladu leedahay, dhismooyinka qashinka iyo biyaha daadka, qurxinta dhulka dhismayaasha magaaladu leedahay, ilaalinta iyo habeeynta dhulka geedaha leh ee magaalada, iyo dayactirka maktabadaha Magaalada iyo dhismayaasha kale ee bulshada.

Howlaha

- Dayactirka hantida Magaalada sida wadooyinka, signalada wadooyinka iyo nalalka wadada. Si aad u soo sheegto wax dhibaato ah, fadlan soo booqo <https://www.beavertonoregon.gov/secure/reportproblem/>
- Waxay ku qabtaan barnaamijka cuntada socota dhowr goobood oo magaalada ka mid ah xilliga deyrta.
- Siiyaan dadweynaha tallo bixin qadarin leh oo la xariirta beeraha
- Bixiyaan fasal/qalab waxbarasho oo la xariirta beeraha
-

Horumarinta Dhismayaasha

Qeybta Horumarinta Dhismayaashu waxay isku duwdaa Dib u eegida habka injeeriyada Magaalada iyo dhisida dhismayaasha cusub ee Magaalada Beaverton. Qeybtu waxay ku lug leedahay mashruucayda ay qabayaan dadka shaqsiga ah, hagaajinta kuwa dowlada iyo qaar ka mid ah dib u hagaajinta dhismayaasha ay leeyihiin shaqsiyaadju sida dhisitaanka meelaha baabuurta la dhigto. Qeybta waxay sidoo kale maamushaa sharciyada maamulka meelaha daadku maro iyo isku duwdaa Howlaha Biyaha Nadiifka ee Degmada oo ay kala shaqeeyso qalabka biyaha ee qashinka saarida iyo biyaha daadka.

Howlaha:

- Dib u eegida Qorshaha
- Maamulka Ogolaanshada
- Soo eegitaanka iyo Maamulida Dhismayaasha
- Maamulida Daad Mareenka
- Inay caawinaad ka siiyaan dadweynaha iyo hayadaha bulshada warbixinada ay ka soo codsadaan ee la xariirta sharciga dhismaha iyo injineerada iyo waxyaabaha looga baahan yahay.
- Inay caawinaay dib u habeeynta Habka Injiyeeriga magaalda iyo Xadadka Qariirada Magaalada.

Qaalab barnaamijyadaan soo socda waxaa lagu maamulaa howsha dib ueegida horumarinta oo waxaa laga eegaa inay soo buuxiyeen dhamaanba xadadka laga doonayo:

• Qeybinta biyaha	• Ka gooyinta geedaha iyo ku abuurida Wadooyinka
• Meelaha biyaha wasaqda iyo daadku maro	• Dayactirka meelaha biyaha wasaqada lagu hayo
• Qalajinta dhulka iyo tayada biyaha	• Dayactirka wado mareenka
• Sameeynta wadooyinka	• Sameeynta nalalka ganacsiga
• Helitaanka wadooyinka	• Baneeynta dhul weyn
• Sameeynta wadad guriga	• Shaxda Dhulka qoyaanka
• Meelaha wadada dadku ka	• Ilaalinta daxalaysiga

maraan (Sidewalks)	
<ul style="list-style-type: none"> • Sameeynta nalalka wadooyinka 	<ul style="list-style-type: none"> • Jid u leh (<i>Easements / Right-of-way</i>)
<ul style="list-style-type: none"> • Sameeynta signalada baabuurta 	<ul style="list-style-type: none"> • Raadka Daad Mareenka
<ul style="list-style-type: none"> • Goynta Wadooyinka 	

Barnaamijka Howlaha Web-sidku waxa uu siiyaa howlaha magaaladu qabato oo internetka ay ka heli kartaan 24-ka saac dadweynaha Beaverton, ganacastada, martida shaqaalaha Magaalada iyo hayadaha bulshada iyo war gelin iyo howlo kale oo ay ugu qabtaan internetka iyo dosiyada dowlada ee loo yaqaan e-Government applications.
www.BeavertonOregon.gov

TUSMADA

Baabuurtu la dayacay	10
Adapt-A-Home	4
Barnaamijka Alarm-ka.....	12
Kala Talinta Beeraha	13
Illaha iyo La xariirinta farshaxanka	7
Guddiga Farshaxanka Beaverton	8
Beaverton Cares.....	8
Maktabada Magaalada Beaverton	2, 3
Kaqeybgalka Gudiga Bulshada Beaverton.....	8
Guddiga Tallo Bixinta Buskuleetiga.....	8
Fursadaha Qandaraasyada	7
Guddiga Racfaanka Dhismaha	8
Boards and Commissions	8
Guddiga Miisaaniyada	8
Qarashka dhismaha/ogolaanshada.....	4
Barnaamijka Deynta Balaarinta Ganacsiga.....	5
Kobcinta Ganacsiga.....	5
Lasineda Ganacsiga	7
Barnaamijka Deynta Ganacsiga.....	5
Balaarinta & Dib dejinta Ganacsiga.....	5
Kilinigyada Kursiga Baabuurka	12
CERT.....	6
Certificate of Occupancies issued.....	4
Guddiga Tallo bixinta dadka Curyaamiinta.....	9
Shirarka Wakiilada Magaalada	10
Xaflada Magaalada.....	8
Qorshaha Bulshada	4
Tirada Denbiyada Intranetka.....	12
Jabinta Denbiyada	12
Fasaxa Masawirada Derbiyada.....	10
Caawinaada Horumarinta	5
Xafladaha jeexjeexida Sirta	12
Hagaajinta Dukaanada Faras Magaalada	5
Dhaqaalaha Beeraha.....	5
Howlaha Doorashooyinka	10
Barnaamijka Deynta Dhaqaaleynta Tamarta.....	4
Ilaalinta Daxaleysiga	14
Heshiiska ka joojinta soo maritaanka	12
Howlaha Baaritaanka Faraha.....	12
Raadka Daad Mareenada	14
Diiwaangelinta Beeraha.....	12
Tirtirida Masawirada	10
Barnaamijka Badbaadada Guriga	12
Hope-4-Homes	4
Guddiga Xaquuqda Bini Aadanka	9
Badbaadada xaditaanka Aqoonsiga iyo Badbaadada Qlyaamada	12

Baaritaanka.....	4
Shaqooyinka cusub ee Magaalada	7
Howlaha Dhagasiga (Jury Duty).....	12
Habka Milkiilayaasha/Ijaartaha.....	13
Leaf vacuum/disposal	13
Guddiga La Talinta Maktabada	9
Qariirada.....	4
Deeqda u dhiganta.....	9
Mayor's Youth Advisory Board	9
Mend-A-Home.....	4
Shirarka NAC.....	9
Habeenka dibad u soo bixida qaranka	13
Guddiga Ururka Derisyada.....	9
Ilaalada Deriska	13
Ganacsiga hada bilaabanaya.....	5
Howlaha Nootaayaha.....	10
Fasaxa Barkin-ka	7
Codsiga Basaboorka.....	7
Maxkamada Caruurta (Peer Court)	13
Fasaxa Shimbiraha	10
Dib u eegida Qorshaha	4
Dib u eegida Qorshaha iyo dhagsiga dadweynaha.....	4
Guddiga Qorsheeynta.....	9
Ururka Cayaaraha Booliiska.....	13
Howlaha codsiga ka horeya	4
Iskudiyarinta Waxbarashada	6
Codsiga Rekoorka dadweynaha	10
Ganacsiga Guryaha Waayeelka.....	7
Dalbashada Qolka (Magaalada/Maktabada)	10
Barnaamijka fasaxaada kursiga baabuurka	12
Guddiga Tallo bixinta Waayeelka.....	9
Habka Biyaha Qashinka.....	6
Goobaha Biyaha Qashinka	6
Diiwaangelinta denbiilayaasha galmada	13
Dayactirka wado mareenka.....	14
Sister Cities Advisory Board.....	9
Goobaha Biyaha Daadka	6
Goynta Wadooyinka.....	14
Sameeynta Nalalka wadooyinka	14
Abuurida iyo ka goynta geedaha wadada.....	14
Dib u bedelida geedaha wadada	10
Qalajinta dhulka iyo tayada biyaha.....	14
Daraasada urvey data.....	5
Blog-a Dib u abuurida	11
Ganacsatada ka shaqeysa Teknolajiga.....	5

Barnaamijka Yareeynta Gaadiidka	6
Gudiga Gaadiidka	9
Maxkamada Gaadiidka	12
Sameeynta signalka baabuurta.....	14
Ganaaxa baabuurta	12
Dib u habeeynta Magaalada	4
Biilka korontada, biyaha, iwm.....	7
Dhismo Banaan	10
Barnaamijka Ilaalinta ee Fasaxa	13

Caawinaada Dhibanayaasha	3
Guddiga Tallo bixinta Aragtida	9
Xafladaha MAqalka iyo Muuqaala leh	7
Dhaqaaleynta Biyaha.....	6
Eegitaanka Meelaha Biyuhu Iskugu yimaadaan.....	6
Helitaanka Qalabka Biyaha	6
Hagaajinta Dhulka qoyan	14